

Xaashida Shaqada Hoy-Siinta Shaqaalaynta Macmiilka DVR

MAGACA LATALIYAHA DVR

Macaamiisha DVR waxay ka wada xaajoon karaan codsiyada hoy-siinta goobta shaqada iyagoo wakiil iska ah, ama caawimaada DVR haddi la codsado. Si taageero loo siiyo macaamiisha inta ay sameynayaan go'aamada kusaabsan hoy-siinta ay ka codsadaan loo shaqeeyaha, DVR waxay bixisaa xaashidan shaqada si ay ugu noqoto isha fikradaha lagu keeno hoy-siin gaar ah oo macquul ah iyo dukumiinti ka caawin kara taageeridda macmiilka inta ay kala wada xaajoonayaan codsiyada hoy-siinta macquulka ah. Macaamiisha iyo lataliyaashu waxay kawada hadli doonaan macluumaadka uu macmiilku keeno si ay gacan ooga geystaan qaabeynta wada xaajoodka macmiilka.

Magaca Macmiilka DVR:	
Maxay tahay naafonimadeyda oo sidee ayey ii saameyneysaa (waa maxay waxyaabaha iga xaddidaya shaqeynta)?	Maxaan isu qaban karaa si aan u maareeyo naafonimadeyda?
Muxuu qofka aan u shaqeeyo sameyn karaa si uu iiga caawiyo sii wadashada gudashada muhiimka ah ee waajibaadka shaqo? (Waa maxay hoyga caawin ii noqon kara?)	Haddii loo baahdo, xirfadlehee caafimaad ayaa bixin kara warqad ama dumumiintiyo taageero u noqonayo codsiga hoy-siinta?

Ka eeg dhinaca dambe si aad u hesho tusaalooyinka hoy-siinta macquulka ah iyo liinkiyada ilo kheyraad oo dheeraad ah.

Codsashada Hoy-siinta

Sidee ayaan u codsadaa hoy-siin?

Marka loo eego sida uu qabo komishanka EEOC, waa inaad kaliya ogeysiisaa qofka aad u shaqeyso inaad ubaahan tahay hagaajin ama wax ka baddelka shaqada sabab la xariirto xaalad caafimaad darteed. Waxaad isticmaali kartaa "Af-Ingiriis fudud" si aad u codsato mana lagaaga baahno inaad magacawdo ADA ama inaad isticmaasho weedha "hoy-siin macquul ah."

Codsiyada hoy-siinta macquulka ah ma ubaahna inay noqdaan qoraal marka hoy-siinta waxaad ku codsan kartaa wada sheekeysii fool-ka-fool ah ama isticmaalka hab kasta oo kale oo wada xiriirka ah. Hase yeeshee, waad rabi kartaa inaad codsigaaga qoraal kadhigto xitaa haddii qofka aad u shaqeyso uusan ubaahneyn.

Sidee ayaan ku ogaanayaa marka la codsanayo hoy-siin?

Waxaad codsan kartaa hoy-siinta waqti kasta inta lagu jiro hannaanka codsiga ama marka lagu shaqaaleysiiyo. Go'aansashada goorta ugu fiican ee loo sheego qofka loo shaqeyso baahida loo qabo hoy-siin macquul ah ee shaqada waa arrin go'aankeedu leeyahay shakhsiga. Guud ahaan, waa inaad codsataa hoy-siin markaad ogaato inay caqabad kajirto goobta shaqada, oo naafonimada darteeda, kaa hor istaageysa u tartamidda shaqada, shaqo gudashada, ama inaad hesho helitaan loo siman yahay ee gunnada shaqada.

Ma inaan u sheegaa qofka aan u shaqeyso inaan naafo ahay?

Sida uu dhigayo sharciga ADA, dadka loo shaqeyso kaliya waxaa looga baahan yahay inay hoy-siiyaan shaqaalaha dhibaatooyinka kala kulmaya goobta shaqada oo ay ugu wacan tahay naafonimo. Sidaa daraadeed, ilaa aad ooga sheegto qofka aad ushaqeyso inaad naafo tahay, qofka aad u shaqeyso waajib kama saarno inuu tixgeliyo inuu hoy kusiiyo sida uu dhigayo sharciga ADA.

Macluumaad caafimaad intee la'eg ayey tahay inaan siiyo qofka aan u shaqeyso?

Qaar kamid ah shaqaalaha ma doonayaan inay dadka ay u shaqeyaan siiyaan macluumaad badan oo kusaabsan naafonimadooda. Waxaad bilaabi kartaa inaad u sheegto qofka aad u shaqeyso waxa dhibaataada kugu ah inaad qabato, in dhibaataadu la xariirto naafonimo, iyo waxa ay yihiin fikradahaaga hoy-siinta. Qaar kamid ah dadka loo shaqeyso ma kusii weydiin doonaan macluumaad dheeraad ah. Hase yeeshee, dadka loo shaqeyso waxay xaq u leeyihiin inay macluumaadka caafimaadka oo dheeraad ah codsadaan marka qof shaqaale ah uu codsado hoy-siin oo haddii aadan keenin, qofka loo shaqeyso wuxuu diidi karaa codsigaaga hoy-siinta.

Waa maxay hoy-siinta aan codsan karo?

Guud ahaan, hoy-siintu waa isbadal kasta oo ku yimaada goobta shaqada ama habka caadi ahaan wax loo qabto oo u sahlaya qofka naafada ah inuu helo fursado shaqo oo loo wada siman yahay. Sida uu dhigayo sharciga ADA, dadka loo shaqeyso waxaa looga baahan yahay inay hoy-siin "macquul" ah siiyaan shaqaalaha naafada ah. Sidaa daraadeed, waxaad codsan kartaa hoy-siin kasta oo loo arko inay tahay "macquul." Halkaan waxaa kuyaalo qaar kamid ah tusaalooyinka hoy-siinta macquulka ee ka socdo EEOC:

- kadhigitaanka tashiilaadka jira kuwo la heli karo
- helitaanka ama hagaajinta agabka
- keenista akhriyayaal ama tarjumayaal uqalmo.
- dib ugu qoondaynta booski bannaan
- fasax caafimaad

Kuwa soo socdo looma tixgeliyo inay yihiin noocyo kamid ah hoy-siin macquul ah oo sidaa daraadeed looma baahno sida uu dhigayo sharciga ADA:

- kasaarista ama baabi'inta hawl muhiim ah oo kamid ah shaqada
- hoos udhigidda heerarka waxsoosaarka
- bixinta waxyaabaha gaarka loo isticmaalo sida addimaha lagu socdo ee macmalka ah, kursiga curyaanka, ookiyaalayaasha indhaha, qalabka caawinta maqlitaanka, ama aalado lamid ah haddii sidoo kale iyagana looga baahan yahay meelo kabaxsan shaqada

Halka wax ee xaddidayo waajibbaadka saaran qofka loo shaqeyso ee ah inuu bixiyo hoy-siin macquul ah waxay tahay in isbaddalka ama wax hagaajinta noocaan ah aan loo baahneyn haddii "dhibaato aan loo meel dayin" ku keeneyso qofka loo shaqeynayo. "Dhibaato aan loo meel dayin" micnaheedu waxay tahay dhibaato ama kharash weyn oo diiradda saaraya ilaha kheyraadka iyo duruufaha qof loo shaqeyso oo gaar ah oo la xariiro kharashka ama dhibaataada ka imaaneyso bixinta hoy-siin gaar ah. Qofka loo shaqeynayo waa inuu qiimeeyo iyadoo lagu saleynayo kiisba-kiis in haddii hoy-siin macquul ah oo gaar ah ay u keeni karto dhibaato aan loo meel dayin.

Macluumaadka kor ku xusan waxaa laga soo xigtay isha Shabakadda Hoy-siinta Shaqada, "Hagaha Baraatikada ah ee Shaqaalaha ee lagu Codsanayo oo Lagula Xaajoonayo Hoy-siin Macquul ah Sida uu Dhigayo Xeerka Ameerikaanka Naafada ah." Wixii macluumaad dheeraad ah, oo ay kujiraan tusaalooyinka xaaladaha iyo saambalka warqadda codsiga hoy-siinta, ka eeg ilaha kheyraadka ee kujira Xaashida Shaqada Qalabka Hoy-siinta ee Bisha Janaayo barta onlaynka <https://askjan.org/toolkit/index.cfm>.

Shabakadda Hoy-siinta Shaqada waa adeegga Xafiiska ee Siyaasadda Shaqaaleynta Naafada ee Waaxda Shaqada ee Mareykanka.